# Warkii ugu Dambeeyey ee Dhaqangalinta Xeerka Sharfidda Caadadda Dumarka ee PPS

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan jecelnahay inaan idin siino warkii ugu dambeeyey ee dhaqangalinta Xeerka Sharfida Caadadda Dumarka, ee Dugsiyada Dadweynaha Portland kaasi oo Guddoomiyaha Gobolka Oregon Kate Brown sharci ahaan u saxeexay sanadkii 2021. Xeerkani wuxuu dugsiyada dadweynaha wuxuu dhigayaa in dhammaan ardayda la siiyo agabka caadadda oo lacag la'aan ah. Dugsiyada Dadweynaha Portland sharci ahaan ayay u bilaabayaan. Inta lagu gudo jiro sanad-dugsiyeedka 2021-22, dugsiyada degmadu waxay dhigayaa agab lacag la'aan ah kuwaasi oo dhammaan laga heli karo musqulaha loogu talogalay inay isticmaalaan jinsiyada oo dhami ee dugsiyada sarre.

Laga bilaabo sanad-dugsiyeedka soo socda ee (2022-23), agabkaasi waxaa laga heli doonaa dhammaan musqulaha( lab, dhedig, dhammaan-jinsiyada) dhisme kasta oo waxbarasharo ka socoto Dugsiyada Dadweynaha Portland. Si loo xaqiijiyo ku dhaqangalka waqtigii loogu talogalay, PPS waxay amartay in 500 laga dhex sameeyo musqulaha. Goobaha laga sameeyey dhammaan musqulaha gabdhaha ee dugsiyada hoose iyo dugsiyada dhexe iyada oo dhammaan laga sameyn doono dhammaan inta soo hadhay musqulaha oo ay ku mid yihiin musqulaha wiilasha sanadka soo socda. Sida loo isticmaalayo xafaayadaha waxaa loogu dhejin doonaa dhammaan musqulaha.

Marka laga yimaado agabka la siinayo, barnaamijkani wuxuu ina xasuusinayaa inay dhammaan dugsiyada PPS siiyaan waxbarasho koriin leh, horumar leh, iyo qaan-gaarnimo ay ka mid tahay caafimaadka caadadda (OAR 581-22-2050). Intaas waxaa dheer, caafimaadka iyo kooxda Waxbarashada Caafimaadka Jirka/Qabatinka ayey bixinayaan dhammaan dugsiyada K-12 iyada oo sal looga dhigayaa casharada aasaasi ah ee afarta rukun Sharfida Caadadda Hawwnka oo ay ka mid tahay Qarsoodinimada, in dhammaan ay Wada haleen gabdhuhu, La heli karo, iyo Waxbarashada. Waxbarashadani, sida dhammaan horumarinta casharada iyo koritaanka PPS, waa mid mar walba togan, la baro iyada oo laga xishooneyn, iyo inay helaan dhammaan jinsiyada ardayda oo dhami iyo dhammaan kartidooda.

Waxaan fahamsanahay inay suurtagal tahay in tani ay ardayda qaarkood ku cusub tahay ee fasalada qaarkood. Sidaas darteed ayaan dareenay inay muhiimad gaar ah leedahay inaan idinla wadaagno faahfaahino ku saabsan barnaamijkani.

Waxaan waalidiinta ku dhiirigalineynaa inay kala sheekeystaan ardaydooda marka ay guriga ku sugan yihiin arrimaha ku saabsan caadadda gabdhaha, agabka caadadda loo isticmaalo, isku taga jinsiyada, iyo caafimaadka. Barnaamijkani wuxuu si fiican u meel marin doonaa haddii aan iskaashano sidii loo yareyn lahaa xishoodka iyo ceebeynta ku gadaaman caadadda iyada oo la caawinayo dhammaan ardayda sidii ay uga hadli lahaayeen waxyaabaha aasaasiga ah ee ay u baahan yihiin sidii ay Meesha uga saari lahaayeen caqabaha ku xeeeran guud ahaan waxbarashadooda. Halkan waxaa ku arki doontaan agabyo aad ka bilaabi doontaan wada hadalada:

- Caadadda: Waxa la Rajeynayo, Fiidiyowga Amaze.org ee caadadda oo qeyb ka ah qaan-gaadhnimada
- Nadiifinta Caadadda: Xafaayadaha Caadadda,  Fiidiyow Agabyada Caadadda ah halkan ka fiirso Amaze.org
- Koritaanku Waa Wax Iska Caadi ah, Xarunta Caafimaadka Galmada ee Calgary, Qoraalo kooban oo ku saabsan qaangaadhnimada
- Waxaad Heshay Caadaddii Kuugu Horeysa… Iminka Waa Maxay?, CAADDO, Qoraal kooban oo ka hadlaya caadadda iyo agabyada
- Khayaaliga Xafaayadaha, Playtex, bogga shabakada macluumaadka warar ka hadlaya macluumaad aan sax ahayn
- Ep 18 – Aynu ka wada hadalno caadadda – Heerka Koowaad, Lix Daqiiqo ah Waxbarashada Ku Saabsan Galmada,warbixin kooban oo ku saabsan daryeelayaasha iyo aasaaska caadadda caruurta

Haddii aad haysaan wax su'aalo oo ku saabsan waxbarashada iyo dhaqangalinta, fadlan waxaad la xiriirtaan Jenny Withycombe ee jwithycombe@pps.net. Su'aalaha ku saabsan agabka iyo taakuleynta, kala xiriira Frank Leavitt ee fleavitt@pps.net.